



hio

Deeqaha Waxbarashada Caruurnimada Hore

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto barnaamij la awoodi karo kaas oo uu diyaarin doonaa afar-sano jirkaada inuu ku guuleysto xanaanada carruurta.

Deeqda Waxbarashada Caruurnimada Hore waxay ka caawin kartaa ilmahaaga inay tagaan waxbarashada dugsiga barbaarinta oo tayo sare leh, barnaamijka Head Start, xarunta daryeelka carruurta, ama daryeelka carruurta ee guriga qoyska si uu diyaar ugu noqdo kindergarten-ka.

Deeqdaan waxay ka bixisa qaar ka mid ah carruurta ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo ku nool meelaha uu dakhligoodu yar yahay in ay ka soo qeybgalaan. Lacagta waxaa si toos ah loo siinaya dugsiga ama xarunta daryeelka carruurta - lagu magacaabo "barnaamijka." **Si aad ugu qalanto, ilmahaagu waa inuu yahay afar sanno jir bilowga sannad dugsiyeedka.**

Shaqada barnaamijka ayaa ah inay uga dhigaan ilmahaaga waxbarashada mid faraxad leh iyo inay siiyan xirfadaha uu u baahan doono si uu diyaar ugu noqdo Xanaanada Caruurta.

Siddeeda Faa'iido ee Dugsiga Barbaarinta Tayada Sare Leh ee Ilmahaada

1. Ilmahaagu wuxuu diyaar u ah noqon doonaa kindergarten-ka.

Carruurta qaarkood ayaan waligood helin macallin ama ka mid noqon koox caruur ah oo badan. Ilmahaagu wuxuu ku baran doona in wax la wadaago, qaataan markooda iyo raaco tilmaamaha. Taasi waa muhiim marka uu gaaro dugsiga barbaarinta (kindergarten)!

2. Ilmahaagu wuxuu yeelan doona xirfadaha bulshada iyo dareenka ee muhiimka ah.

Macalimiintu waxay ka caawin doonaan carruurtu inay bartaan sida loo isticmaalo waqtiga ay ka fog yihiin qoysaskooda. Ilmahaagu wuxuu baran doonaa sida loo xalliyi dhibaatooyinka. Wuxuu ku baran doona sida loo maareeyo dareenada sida murugada iyo cadhada.

3. Ilmahaagu wuxuu ka qeyb qaadan doona hawlaho loo qorsheeyay isagga kaliya.

Macalimiintu ayaan qorsheeya hawlo badan. Ilmahaagu waxay awoodaan in ay doortaan kuwa iyadu ama isagga soo jiidan doona kara. Howlahaasi waxay ka caawin doonaan inay u koraan iyo u horumaraan siyaabo fara badan.

4. Ilmahaagu wuxuu noqon doonaa mid cajib ah oo doonaya inuu wax barto.

Macalimiintu ayaan la socon doonaa ilmahaaga iyo weydiin doona su'aalo ku saabsan wavaa uu samaynayo ama wavaa dhici doonaa. Su'aalahaan saaxiibtinimada ah waxay ka caawin doonaa isaga inuu ka fikiro dunida hareerahiisa.

5. Ilmahaagu wuxuu baran doonaan sida loo daryeelo naftooda iyo loo caawiyo dadka kalena.

Ilmahaagu waxay ku baran doonaan sida loo nadifiyo naftooda iyo loo caawiyo fasalka gudahiisa. Waxay ku baran doonaan in ay caawimaad weydiistaan marka ay u baahan yihiin iyo ka taxadaraan alaabtooda u goonida. Waxay ku baran doonaan sida loo caawiyo saaxiibka hadda baranaya wax ay iyagu horey u yaqaaniin.

6. Ilmahaagu waxay ku baran doonaan xisaabta hore iyo xirfadaha wax akhriska.

Maalin kasta, ilmahaagu wuxuu ka qaybqaadan doonaa hawlaho kor loogu qaadayo xirfadahiisa barashada akhriska iyo xisaabta. Wuxuu ku ciyaari doona ciyaaro iyo xujooyin iyo eegaan doonaa buugaagta sawirkha ah. Waxyalaahaasu waxay ka caawin isaga inuu xiiseeyo oo ku farxo iyo horumarinta jacaylka waxbarashada.

7. Ilmahaagu wuxuu yeelan doona xirfadaha dhaqdhqaqaqa.

Carruurta yaryari had iyo jeer waa horay u socdan. Ilmahaagu waxay heli doonaan fursado ay ku ordaan, ku fuulaan iyo ku ciyaaraan ciyaaro firfircoo si loo hagaajiyo kartida jirkooda. Xirfadahooda dhaqdhqaqaquna wey kordhi doonaan iyadoo la isticmaalayo maqasyo, rinjiyeynta iyo gelinaya biin boorka.

8. Ilmahaagu wuxuu kordhin doona xirfadihiisa luqada iyo fikirka.

Erayadda ilmaha - erayada uu isticmaali karo - waxay u kordhaan si dhakhsa ah inta u dhaxeysay da'da 3 iyo 5 jirka. Macalimiintu waxay ku tusi doonaan ilmahaaga erayo cusub maalin kasta. Waxay ka caawin doonaan inuu hadalo iyo xalinta dhibaatooyinka. Waxay ka qaybgalinaya ilmahaaga hawlo gacan ku hayna oo dhisaya xirfadaha fekerka iyo sababaynta.

Si aad u ogaato wax dheeraada

Kala hadal barnaamijka aad jeelaan lahayd ilmahaaga inuu ka qaybalo, ama booqo education.ohio.gov/earlylearning.



Ohio

Department
of Education